Naafooyinka Caqliga iyo/ama Kobaca (IDD)

# Tusmada Xogta

Soo dhawoow waadna ku mahadsan tahay wakhtiga aad gelisay eegista adeegyada IDD! Adeegyada IDD, sidoo kalena loo yaqaano maamulka Kiiska ee Xeerka 185, waa taageero kaa caawinaysa aqoonsiga iyo ka guul gaarista waxyaabaha aad dooneyso inaad samayso. Maamulka Kiiska ee Xeerka 185 waxay gaar u tahay taageerada dadka qaba naafooyinka caliga ama kobaca iyo/ama xanuunnada la xiriira si ay u helaan adeegyada ay u baahan yihiin ee bulshada, caafimaadka, waxbarahada iyo taageerooyinka iyo adeegyada kale. Maamulaha kiiska ayaa ka shaqeynaaya asagoo wakiil kaa ah aqoonsiga natiijooyinkaaga, riyooyinkaaga, iyo baahiyahaaga asagoo xaqiijinaaya sii wadista adeegyada iyo taageerooyinka.

Hoos waxaa ku qoran:

- Xog ku saabsan u qalmida
- Hormarka laga sameeyo codsashada Maamulka Kiiska ee Xeerka 185
- Xog ku saabsan Adeegyada IDD
- Macluumaadyo Dheeraad ah

## SHURUUDAHA U QALMIDA

Waaxda Adeegyada Aadaha (DHS) ayaa ka doonaysa Degmada Washington inay raacdo xeerar gaar ah marka ay go'aaminayso u qalmida Maareynta kiiska Xeerka 185. Si aad ugu qalanto maareynta kiiska ee Xeerka 185, qiimeynta balaaran ee baaritaanka xanuunka waa inay muujisaa inaad qabto naafada caqliga ama kobaca, ama xanuun la xiriira.

### Waa maxay naafada garaadka ama Kobaca?

"Xadidaadaha waawayn ee shaqada iyo caqabada muuqata ee shaqada caqliga..."

- "Xadidaadaha shaqada ee wayn: naafada mudada dheer ee wayn ee uusan qofku qabsan karin hawl ama shaqo"
- "Xadidaadaha qayb ahaan wayn ee shaqada: **cabirka buuxa ee IQ ga 70 ama ka hooseeya**, ayadoo lagu saleynaayo qiimeynta ay ku jirto 1 baaritaannada 1 ah ama ka badan ee sida gaarka ah loo sameeyay ee caadiga ah ee caqli xumada oo loo sameeyay si loo qiimeeyo shaqada caqliga."

"... waxaa la socda ciladaha la xaqiijiyay ee habdhaqanka la qabsiga."

- "Ciladaha habdhaqanka la qabsiga: xadidaado waawayn oo ku gudban waxtarka qofka ee daboolista hawlaha caadiga ah ee qofka qaangaarka ah, madax banaanida shaqsiga ah iyo masuuliyada bulsho ee laga doonaayo qofa da'diisa ah iyo kooxda dhaqanka, sida lagu go'aansho qiimeynta caafimaadka iyo, si guud, cabirada caadiga ah"
- "Dhammaan xaalaha ayaa jiray kahor inta aan qofku gaarin da'da 22aad."

Dadka buuxiya shardigaan ayaa laga helay *Naafada Fudud, Dhexe, Daran, ama Wayn ee Garaadka ama Kobaca*.

Su'aalaha aan ku waydiinayna marka aan go'aaminayno in qof uu u qalmo adeegyada IDD:

- Heerka IQ gu ma yahay 70 ama ka hoos?
- Xanuunku ma jiray kahor inta aan qofku gaarin dhalashadiisa 22aad? Hadday maya tahay...
- Ma jiraa xanuun kale? Hadday haa tahay, waxaan markaas go'aaminaynaa haddii uu jiro "xanuun la xiriira"...

## Waa maxya xanuunka la xiriira?

Haddii IQ gaagu uu ka badan yahay 70, wali waxaad u qalmi kartaa adeegyada IDD marka uu jiro xanuunka la xiriira. Xanuunka la xiriira "waa in lagaa helo naafada daran, ee dabo dheeraatay oo buuxinaysa dhammaan shuruudaha soo socda":

1. "La ogaado inuu aad ula xiriiro naafada kobaca sabab la xiriirta in xanuunku keenaayo naafada shaqada guud ee garaadka ama habdhaqanka la qabsiga oo lamid ah tan qof qaba IDD una baahan daawayn ama adeego lamid ah kuwa ay u baahan yihiin dadka qaba IDD"
2. "Uu jiray kahor inta aan qofku gaarin da'da 22 sano jir"
3. "La filaayo inuu sii socdo abadiyan"
4. "Uu keenaayo xadidaadaha shaqada ee wayn sadex kamid ah ama ka badan aagaga soo socda ee hawlaha waawayn ee nolosha:
    a. Daryeelka Nafta
    b. Fahanka iyo adeegsiga luuqada
    c. Barashada
    d. Dhaqdhaqaaqa
    e. Hagista Naftaada
    f. Tayada Nolosha Madax banaan"

Xanuunnada guud ee la xiriira waxaa kamid ah, laakiin kuma koobna: Xanuunka Autismka, xanuunka baralaatiga, Xanuunka Qalalka, Prader-Willi Syndrome, Xanuunka Kobaca ee Pervasive (PDD), ama Xanuunka Daran ee Qabatinka Khamriga (FASD).

## Shuruudaha Qiimeynta ee u Qalmida IDD

Qiimeynta rasmiga ah ayaa dib u eegis lagu samayn doonaa si loo go'aansho u qalmida IDD. Kuwaan ayaa badanaa loo yaqaanaa qiimeynada baaritaanka, qiimeynada dhimirka, ama qiimeynada neerfaha garaadka. Qiimeynada rasmiga ah waa inuu sameeyaa dhakhtarka dhimirka ama maskaxda oo ruqsad haysta, khabiirka dhimirka ee dugsiga oo shahaado haysta, dhakhtarka neerfaha oo ruqsad haysta, ama dhakhtarka dhimirka oo shahaado haysta. Waxaan diyaar u nahay inaan ku siino khayraadka qaar oo ku aadan meesha aad ka helayso qiimeyntaan qasabka ah! Qiimeynada qaar ayaa lagu qoray dhammaadka tusmadaan.

Fadlan ogoow baaritaannada uu sameeyay dhakhtarka qoyska ama dhakhtar caafimaad (MD) ayaan la aqbali doonin; waxaa nala ka doonayaa inaan dib u eegno qiimeynada rasmiga ah ee xanuunka. Waxaa intaas dheer, qiimeynta ama shuruudaha adeegga IDD ee goballada kale ayaa ka duwanaan kara shuruudaha Minnesota!
Waxaan dib u eegis ku samayn doonaa baaritaan kasta oo aad horay u martay, laakiin waxaad u baahan kartaa inaad marto baaritaan kale si aad u buuxiso shuruudaha u qalmida adeegga IDD ee Minnesota.

## U Qalmida Ilmaha Kayar 5 sano jir

Waxaa jira labo qaab oo ilmaha kayar da'da shan sano lagu go'aamin karo inay u qalmaan deegyada IDD. Qiimeynta rasmiga ah waa in la sameeyay 12 bilood ee lasoo dhaafay kayar.

1. Uu leeyahay buundooyinka qiimeynta rasmiga ah oo ugu yaraan labo buundo ka hooseeya heerka caadiga ah labo aag oo shaqada guud ah. Hal aag waa inuu yahay heerka "garaadka" ama "dhimirka" waana inuu khatar ugu jiraa naafooyinka garaadka iyo/ama kobaca.
2. Lagu qiimeeyay lagana helay inuu qabo *Dib U dhacyada Guud ee Kobaca*
3. Ilmuhu waa inuu qabaa *Xanuun la Xiriira* waxaana loo baahan yahay daawayn lamid ah tan ilmaha qaba IDD.

## U qalmida Ilmaha ka Wayn 5 sano jir

1. Qiimeynta rasmiga ah ay muujinayso cabirka buuxa ee IQ ga 70 ama ka hooseeya AMA laga helo *Xanuun la Xiriira*. Qiimeynta rasmiga ah waa in la sameeyay 12 bilood ee lasoo dhaafay gudadood.
2. *Xanuunka la Xiriira* waa inuu leeyahay baaritaanka xirfadaha la qabsiga oo muujinaaya cilado waawayn, iyo sidoo kale u baahan daawayn joogto ah iyo adeegyo lamid ah kuwa ilmaha qaba IDD. Marar badan tan ayaa u eg cabirka buundada la qabsiga ee guud oo dhan 70 ama ka hoos. (<u>Fadlan ogow: Wareysiga macalinka ayaa loo baahan karaa haddii qof uu hadda ka diiwaan gashan yahay dugsi</u>.)
3. Baaritaanka *Xanuunka Autismka (ASD)* waa in lagu baaraa laguna cadeeyaa baaritaan rasmi ah oo uu sameeyay khabiirka dhimirka ama maskaxda oo ruqsad leh, dhakhtarka neerfaha oo ruqsad leh, ama dhakhtarka dhimirka oo ruqsad leh. **<u>Baaritaanka waxbarashada ee ASD kelya ayaan la aqbali doonin.</u>** Tan ayaa ka dhignaan karta in aad samaysan karto qorsheyaasha baaritaanka dheeriga ah oo ka baxsan goobta waxbarashada. Waxaan ku siin karnaa khayraadka gaarka ah oo aad ka helayso baaritaanka.

## Dadka Waawayn ee ka wayn 18

1. Dadka waawayn ee laga helay IDD (cabirka buuxa ee IQ ga 70 ama ka hoos) ama *Xanuunka la Xiiira* kor ka fiiri).
2. Xanuunka waa inuu jiray, ama la aaminsan yahay inuu soo biloowday, kahor da'da 22.
3. Qiimeynada rasmiga ah waa inay yihiin kuwo cusub, laakiin diyaar ayaan u nahay inaan dib u eegno qiimeyno kasta oo aad martay. Haddii aan qiimeyn rasmi ah abidkeed la samayn, qiimeynta waa in la iskudayaa lana qoraa midkood baaritaanka IDD ama Xanuunka la Xiriira.

## HANAANKA CODSIGA

Haddii aad xiiseynayso codsashada adeegyada IDD, halkaan ayaad ka helaysaa talaabooyinka si aad u biloowdo aadna u dhameystirto hawsha:

1. Ka wac Diiwaan gelinta Adeegyada Naafada iyo Dadka waawayn ee Degmada Washington 651-430-6422. U sheeg shaqaalaha bulshada in aad xiiseynayso codsashada adeegyada IDD. Waxaa lagaa codsan doonaa xogta qaar ee aasaasiga ah marka aad taleefanka ku jirto si loo go'aansho haddii aad buuxisay shuruudaha u qalmida.
2. Codsiga go'aaminta u qalmida Adeegyada/Maareynta Kiiska ee Xeerka 185 ayaa boostada laguugu soo diri doonaa Wakhti xaadirkaan Degmada Washington ayaa keliya awooda inay ku siiso codsiyada warqadda ah.
3. Isla wakhtiga codsiga ayaa boostada laguugu soo diri doono, soo jeedin ayaa loo gudbin doonaa Kooxda Qiimeynta MnCHOICES ee Degmada Washington. Qiimeeyaha ayaa kula kulmi doona si loo sameeyo Qiimeynta MnCHOICES, taasoo naga caawinaysa inaan go'aamino haddii aad u qalanto Maareynta Kiiska ee Xeerka 185, iyo sidoo kale adeegyada kale ee suuragalka ah, barnaamijyada iyo/ama taageerooyinka. Fadlan ogoow in qiimeeyaasheena ay aad ugu dedaalayaan inay la kulmaan dad badan! Waxay qaadan kartaa dhawr asbuuc kahor inta aan qiimeeye awoodin inuu mudeeyo wakhti uu kugula kulmo. Waxaad wali ka shaqeyn kartaa buuxinta codsiga IDD/Maareynta Kiiska Xeerka 185 waxaadna diri kartaa wakhtiga aad doonto inta lagu jiro shaqada qiimeynta MnCHOICES.

   Haddii aad horey u helaysay adeegyada ama barnaamijka, codsiga dalabka idd ayuu diri karaa Qiimeeyaha MnCHOICES, Kaalmada Daryeelka Gaarka (PCA) ama Qiimeeyaha Deeqda Taageerada Macmiilka (CSG), maamulaha kiiska ee kaalmada ama caafimaadka dhimirka.
4. Si adag u buuxi codsiga oo ku soo celi boqshada lagu siiyay. **Si loo yareeyo wakhtiga hawsha dib u eegista u qalmida, fadlan xaqiiji inaad ku darto qiimeynada lagaa rabo (sida kor ku qoran) *codsiga* saxiixan!**

   Fadlan ogoow, in nala ka doonaayo in aan codsigaaga ku hayno mid furan si aad u codsato adeegyada IDD muddo 90 maalmood ah. Haddii codsiga aad buuxisay aan la helin wakhtiga loo cayimay gudihiisa, waa la xiri doonaa codsigaaga. Hase yeeshee, waan fahmaynaa inaad qaadan karto wakhti aad isku dubarido dhammaan shuruudaha codsiga waxaana iskudayi doonaa inaan kuu beekhaamino wakhtigaan si aan kaaga caawino inaad awoodo buuxinta hawsha.
5. Shaqaalaha Bulshada ee Diiwaan gelinta IDD ga Degmada Washington ayaa eegi doona codsiga wuuna kula soo xiriiri karaa si uu kaaga qaado xog dheeri ah ama u dabagal ugu sameeyo agab maqan. Codsiga iyo qiimeynada lagaa rabo aya dib loo eegayaa si loo go'aansho inaad buuxisay u qalmida Maareynta Kiiska ee Xeerka 185. Inta lagu jiro dib u eegistaan, waxaa la ogaan karaa in baaritaan dheeri ah ama xog dheeri ah loo baahan yahay si loo go'aansho u qalmida.

6. Kadib dib u eegista codsiga, Shaqaalaha Bulshada ee Diiwaan gelinta IDD ayaa kula soo xiriiri doona si uu kuugu sheego haddii aad u qalanto adeegyada IDD.

   Haddii aad u qalanto adeegyada IDD, waxaa laguu siin doonaa Maamreeyaha Kiiska IDD kaasoo kula kulmi doona si looga doodo dookhyada taageerada loona abuuro qorshe.

   Haddii aadan u qalmin adeegyada IDD, waxaa boostada laguugu soo diri doonaa Ogeysiiska Talaabada (NOA) kaasoo sheegaaya sababta aadan ugu qalmin iyo xuquuqahaaga racfaanka. Waxaan sidoo kale xaqiijin doonaa in aan ku darno barnaamijyada ama adeegyada dheeriga ah ee faa'iidada u yeelan kara taageeradaada.

*Waxaan codsanaynaa dulqaadkaaga inta lagu jiro hawshaan codsiga. Waxay qaadan kartaa dhawr bilood inaan ku dhamayno dhammaan qiimeynada iyo codsiyada la doonaayo, la isku dhafo, la gudbiyo dib u eegisna lagu sameeyo.*
*Haddii marna aad su'aalo ka qabto hanaanka ama meesha codsigaagu maraayo inta hawshu socoto, haka daahin inaad wacdo: Haddii aad su'aalo ja qabto Hanaank diiwaan gelinta IDD fadlan wac 651-430-6422. Haddii aad su'aalo ka qabto meesha uu maraayo <u>codsi aad horey u soo gudbisay</u>, fadlan wac 651-430-6422 kadibna codso in lagugu xiro Shaqaalaha Bulshada Diiwaan Gelinta IDD.*

## KHAYRAADKA, BARNAAMIJYADA, IYO ADEEGYADA

### MEELAHA AAD KA HELAYSO BAARITAANKA XANUUNKA

Hoos waxaad ka helaysaa qaar kamid ah bixiyaasha laga yaabo inay kaa caawin karaan samaynta baaritaanka xanuunka si loogu adeegsado codsashada maareynta Kiiska IDD. **Marka la isku dubaridaayo qiimeyntaan, fadlan codso Baaritaanka IQ IYO La qabsiga, oo sidoo kale u sheeg dhakhtarka in qofka lagu sameynaayo baaritaanka uusan ku hadli karin erayo (hadday jiraan).** Waa in qarashka laga dalbadaa caymiskaaga; fadlan kala hadal dhammaan su'aalaha dalabka qarashka dhakhtarka samaynaaya qiimeynta.

***Degmada Washington ayaan si gaar ah u taageerayn bixiyaasha liiska hoose ku qoran. Liiskaan maaha mid koobaaya dhammaan khayraadka laga yaabo in la heli karo ee samayn kara baaritaanka marka lagu saleeyo ujeedada codsashada maareynta kiiska ee IDD.***

***Wuxuu muujinayaa inuu awoodo samaynta qiimeynta dadka aan ku hadlin erayada**

- Canvas Health: 651-777-5222
  Dr. Andrew Ballew* *(baareyaal kale ayaa la heli karaa)*
  *(Ogoow: Soo jeedintu waa inay ka timaado Degmada Washington)*
- Qiimeynada Isku Dhafan iyo Daawaynnada*: 651-481-0664
  Dr. Todd Sigler, PsyD, Dhakhtarka Dhimirka oo Ruqsad haysta
- Adeegyada Caafimaadka Dhimirka Qoyska*, West St. Paul: 651-688-2335
  Dr. Stephen Antonello, Dhakhtarka Cilmi Nafsiga Xarunta Caafimaadka
- Nystrom & Associates*, Eden Prairie iyo Woodbury: 651-714-9646

**Dadka Horey u Haystay Dhakhtarka:**

- Children's Minnesota, Minneapolis: 612-813-8455
- Children's Minnesota, St. Paul: 651-220-6753
- Minnesota Epilepsy Group: 651-241-5290

**ADEEGYADA IDD**

Haddii aad u qalato Adeegyada IDD, waxaad u qalmid kartaa adeegyada (ku jira adeegyada IDD ama aad ku helayso meelaha kale) sida gaarka ah loogu sameeyay inay taageeraan dadka qaba IDD ama Xanuunka la Xiriira. Qof kasta oo u qalma Adeegyada IDD ayaa heli doona maareeyaha Kiiska ee Xeerka 185 ama IDD.

- **Kaalmada Naafooyinka Kobaca (DD):** Kaalmada DD ayaa bixisa adeegyada kaladuwan oo ay ku jiraan, laakiin kuma koobna: nasinta daryeelaha, tignooloojiyada Kaalmaatiga ah, tababarka daryeelaha, taageerada qoyska ee gudaha guriga, qalabka kaalmaatiga, iyo Barnaamijka Taageerooyinka Bulshad ee Macmiilku hagaayo (CDSC). Waa qasab inaad buuxiso qaarkood shuruudaha u qalmida si aad u hesho kaalmada DD. Fadlan ogoow in haddii laguu ogolaado adeegyada IDD aysan ka dhignayn inaad si otomaatig ah ku helayso kaalmada DD!

- **Adeegyada iyo Taageerooyinka Shaqada:** Degmada Washington ayaa awooda inay maal gelin siiso si loo taageero dadka raadinaaya iyo kuwa abuuraaya fursadaha shaqada, iyo sidoo kale inay taageerto helitaanka iyo haysashada shaqooyinka. Maal gelinta ayaa la ansixiyaa si loogu sahlo bixiyaha inuu ku siiyo yoolalka la xiriira shaqada. Shaqada ayaa noqon karta mid deegaanka ah ama mid wakaallad dhexdeed ah, waxaana sidoo kale ku jiri kara barnaamijyada bulshada ama dalxiiska ee maalin katsa.
- **Kaalmada Taageerooyinka Qoyska (FSG):** FSG ayaa bixisa deeqda yar ee kaashka ah ee qoysaska carruurta u qalma, ayadoo yoolku yahay in laga hortago ama dib loo dhigo in ilmuhu ka guuro guriga si uu u helo taageerada muhiimka ah, kor u qaadista caafimaadka iyo faya qabka qoyska, iyo taageerada baahiyaha la xiriira kala-guurka. Waxaa jira dakhliga sanad kasta wax laga badelo oo loo qalmi karo. Waaa inaad tahay qof qaba naafo la xaqiijiyay si aad u hesho FGS lana go'aansho in adeegyada IDD ay buuxinayaan shardigaan.
- **Daryeelka Nasinta Daryeelaha:** Kani waa adeegga dadka waawayn iyo carruurta ee loo sameeyay in lagu nasiyo daryeeleyaasha, waxaana lagu bixin karaa gudaha ama banaanka guriga. Daryeelka nasinta ah ee ka baxsan guriga kaasoo lagu diyaarshay Adeegyada Bulshada ee Degmada Washington ayaa caadiyan lagu baxshaa xarunta daryeelka ilmaha ee ruqsada leh. Waxaa jirta fursado kaladuwan oo aad ka helayso qaarkood qorsheyaasha oo ay qoysasku si dadban u diyaarsan karaan daryeelka nasinta ah. Daryeelka nasintu waa kooban yahay, malahan damaanad, waxaana laga yaabaa in lacag lagaa qaado.

- **Maareynta Kiiska Xeerka 185**: Maamulaha kiiskaaga ayaa ku siin doona taageerada diirada saarays qofka, oo ay ku jiraan: aqoonsiga barnaamijyada ama adeegyada suuragalka ah, talo bixinta, xogta ku saabsan khayraadka, iyo isku xirka adeegyada iyo barnaamijyada. Maamulaha kiiskaaga ayaa kaala hadli kara barnaamijyada aad u qalmi karto kaana caawinaaya abuurista qorshe taageero. Qorshahaan taageerada ayaa loogu yeeraa qorshaha Adeegyada iyo Taageerooyinka Abaabulan (ama CSSP). Kan ayaa la abuuraa kadib marka la dhameeyo Qorshaha Taageerada Bulshada (ama CSP) kaassoo la abuuray intii lagu jiray hawsha qiimeynta MnCHOICES. Haddii aadan marin hanaanka MnCHOICES, maamulaha kiiskaaga ayaa kaa caawin doona inaad buuxiso Qorshaha Taageerada Gaarka ah (ISP) ama Qorshaha Taageerada Qofka Diirada Saaraysa uu kula abuuro.

## MAAL GELINTA KALE IYO BARNAAMIJYADA

Waxaa jira barnaamijyo kale iyo adeegyo aad heli karto oo aan kaa doonayn inaad u qalanto Adeegyada IDD. Khayraadkaan la heli karo ayaa lagaala hadlayaa inta lagu jiro hawsha Qiimeynta MnCHOICES. Kuwaan waxaa ku jira, laakiin kuma koobna:

- **Maareynta Kiiska Caafimaadka Dhimirka Carruurta:** Maareynta Kiiska Caafimaadka Dhimirka Carruurta ee Degmada Washington waxaa bixisa Canvas Health. Adeegyadaan ayaa loogu talo galay inay caawiyaan carruurta iyo dhalinyarada (ilaa da'da 18 iyo mararka qaar ilaa da'da 21) ee qaba dhibaatada xun ee shucuurta. Canvas Health waxaa lagala xiriiri karaa 651-777-5222.
- **Barnaamijka Deeqda Taageerada Macmiilka (CSG):** Kani waa deeqd macmiilka loogu talo galay ee bilaha ah oo ku siinaysa awood dheeri ah iyo fursado kaladuwan oo aad ku xulanayso shaqaale aadna ku iibsanayso adeegyada ama qalabka. Waalidiinta ilmaha yaryar ayaa sidoo kale qarashaadkooda ku bixin kara barnaamijkaan. Barnaamijka CSG waa qaab kale oo aad ku adeegsan karto saacadaha PCA ee aad u qalmi karto. Waa qaybta gobalka ee saacadaha PCA ama kalkaalinta ee la ogolaaday.
- **Medical Assistance (MA, Caawimaada Caafimaadka):** Barnaamijka dhiibista qarashka caafimaadka iyo qaar kamid ah adeegyada taageerada ee qoysaska danyarta ah ama dadka ka wayn 18. Medical Assistance ayaa maal gelisa adeegyo badan oo kuwa bulshada ah, ayna ku jiraan kaalmada DD iyo adeegyada PCA. Waxaa jira qaabab kaladuwan oo aad ku codsan karto MA. Si aad u hesho xogta ku saabsan codsashada dheefaha, ka wac Taageerada Dhaqaalaha ee Degmada Washington 651-430-6455 ama booqo: [www.co.washington.mn.us/2382/Applying-for-a-Health-Care-Program](www.co.washington.mn.us/2382/Applying-for-a-Health-Care-Program). Haddii aad codsanayso adoo wakiil ka ah qof naafo ah, waxaa lagugu boorinayaa inaad la tasho xiriiriye. Qaar laga heli karo gudaha ama aaga Degmada Washington ayaa noqon kara:
  - The Arc - Greater Twin Cities, St. Paul: 952-920-0855
  - Canvas Health, Forest Lake: 651-251-5223)
  - Portico, St. Paul: 651-489-2273
  - Somali Health Solutions, Minneapolis: 1-855-566-7873
- **Qiimeynada MnCHOICES iyo Taageerooyinka iyo Adeegyada Daryeelka Mudada Dheer:** Adeegyada iyo taageerooyinka mudada dheer ayay heli karaan dadka buuxiya

shuruudaha u qalmida qaarkood. Talaabada koobaad ee go'aaminta haddii taageerooyinkaan ay kuu yihiin dookh, ayna ku jiraan Maareynta Kiiska IDD, waa inaad codsato qiimeynta MnCHOICES. Codsigaan ayaa la diri karaa ayadoo la wacaayo 651-430-6422.

- **Kalaamada Daryeelka gaarka ah (PCA):** Adeegyada PCA ayay maal geliyaan Medical Assistance (MA) iyo dhammaan barnaamijyada kaalmada. Qiimeynta MnCHOICES ama PCA ayaa go'aaminaaya tirada saacadaha PC ee maalin kasta oo aad u qalmi karto. Adeegyada PCA ayaa loo sameeyay inay taageero ka baxshaan daryeelka gaarka ah iyo sidoo kale baahiyaha caafimaadka ee balaaran iyo baahiyaha shucuurta iyo habdhaqanka. PCA-yada ayaa laga soo qaadan karaa wakaalad gaar loo leeyahay ama waxaad dooran kartaa PCA CHOICE waxaadna qaadan kartaa shaqaalahaaga gaarka ah.
- **Dakhliga Kaalmada Kabista Dakhliga (SSI) ama Caymiska Naafada Hawlgabka ama Dadka Dhaxalkiisa Leh (RSDI):** Kuwaani waa gunnooyin la siin karo carruurta qaba naafooyinka u qalma ee qoysaskoodu ay haystaan dakhliga aadka u yar. Da'da 18, dakhliga qoyska ayaan intaas kadib ahayn sabab u qalmid. Ka wac Social Security 1-800-772-1213.
- **TEFRA:** Kani waa MA ga carruurta u qalma naafooyinka ee la nool qoysaskooda aana u qalmin MA sabab la xiriirta dakhliga qoyska oo aad u sareeya. Keliya dakhliga ilmaha iyo naafada ayaa loo adeegsan doonaa go'aaminta u qalmida. Waxaa jira khidmada waalidka ee gobalka ee TEFRA, ayadoo lagu saleynaayo dakhliga qoyska iyo tirada qoyska. Xog faahfaahsan ayaa laga heli karaa: www.dhs.state.mn.us/main/idcplg?IdcService=GET_DYNAMIC_CONVERSION&RevisionSelectionMethod=LatestReleased&dDocName=id_007117.
- **Waaxda Taageerada Dhaqaalaha ee Degmada Washington:** Ayadoo kaashanaysa Waaxda Adeegyada Aadaha ee Minnesota (DHS), Waaxda Adeegyada Bulshada ee Degmada Washington ayaa bixinaya barnaamijyo bixinaaya taageerada dadka danyarta ah ee dagan Degmada Washington, sida taageerada kaashka, barnaamijyada caafimaadka, taageerada cuntada, iyo caawimaada daryeelka ilmaha. Khubarada U Qalmida (oo badanaa loogu yeero shaqaalaha dhaqaalaha) ayaa kaa caawin kara raadinta dookhyada kuu furan. Wixii macluumaad dheeraad ah ku saabsan dheefaha wac 651-430-6455.
- **Adeegyada Caafimaadka Dadwaynaha ee Degmada Washington:** Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha iyo Bii'ada ayaa bixisa adeegyada caafimaadka Dadwaynaha ee shaqsiyaadka, qoysaska, iyo bulshada. Yoolalka adeegyadaan waxaa loo sameeyay inay kahortagaan faafitaanka cudurada caabuqyada, kor u qaadista qaab nololeedyada caafimaadka leh iyo dhisida caafimaadka bulshada. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan khayraadka lagu heli karo Caafimaadka Dadwaynaha wac 651-430-6655.